# Warbixin ku saabsan ku heyn qof ciqaab xabsi

Buuggan waxad ka akhrisan kartaa waxyaabo ku saabsan sharciyada muhimka ah, ee ku wajahan kuheynta qof xabsi. Haddii aad rabto inaad waxbadan ogaato, waxad ka amaahsan kartaa qawaaniinta iyo sharciyada shaqaalaha meesha. Waxad mar walba weydiin kartaa shaqaalaha, haddii ay jiraan wax, aad ka shakisan tahay.

KRIMINAL FORSORGEN

2025

## 1. Xabsi dhexe ama jeelka degmada?

Wakhtiga ciqaabta xabsi waxa sida caadiga ah lagu qaataa xabsiga dhexe.
Haddii ciqaabtaadu ay gaaban tahay, ama xaalado kale oo khaas ah ay jiraan, waxa laga yaabaa in lagugu haayo jeel ama xabsiga Kobenhagen ee (”Xabsiga Galbeed” ) (”Vestre Fængsel”). Halkan meelo badan waxa ka shaqeeya isla sharciyadaa xabsiga xiran; ka fiiri hoos faahfaahin dheeri ah.

## 2. Xabsi furan ama xiran?

Ciqaabta xabsi waxa qofka sida caadiga ah lagu haayaa xabsi furan. Agaasinka maamulka xabsiyada iyo maxaabiista ayaa go´aamin karta, in caqaabta laga dhigo mid qofka lagu haayo xabsi xiran, tusaale ahaan haddii ciqaabtaadu tahay shan sano ama ka badan.
Xabsiga xiran waxa jooga shaqaale badan iyo kontorool marka loo fiiriyo xabsiga furan. Xeerar kala duwan ayaa khuseeya xabsiga xiran oo ku saabsan tusaale ahaan, lacagaha, isticmaalka taleefanada, booqashada iyo bixitaanka. Fiiri qeybta hoose.

## 3. Qeybaha kalabar furan

Haddii lagu keeno ama laguu gudbiyo xabsi xiran, waxa mararka qaar dhici karto in taa badalkeeda ay ka dhigan tahay in lagu keenay ama laguu soo wareejiyey qeyb xiran – tusaale ahaan, haddaad u baahan tahay ilaalin. Inta badan xabsiyada furan waxa jira qeybo kala bar furan.
Warbixin ku saabsan qeybaha kala bar furan waxad ka heli kartaa shaqaalaha.

## 4. Ugudbin xabsi xiran

Haddii aad khalad u isticmaasho xorriyadda ballaaran, ee aad ku heysato xabsiga furan, waxad halis ugu jirtaa in laguu gudbiyo xabsi xiran. Taasi waxa ay sida caadiga ah dhacdaa, haddii aad tusaale ahaan ka tagto xabsiga ogolaansho la´aan, aad soo geliso ama khalad u isticmaasho maandooriye/mukhaadaraad ama aalkolo, muujisato hanjabaad ama rabsho ama dambiyo kale ee gudaha ama bannaanka xabsiga.

Hadii laguu wareejiyo xabsi xiran, waxad weydiin kartaa shaqaalaha fursadda aad u leedahay bal in mar dambe laguu gudbiyo xabsi furan.

## 5. Xisaabta ciqaabta

Xukunka kadib, ama marka aad soo gasho xabsiga, waxaad heleysaa wax la yiraahdo xisaabta ciqaabta. Halkan waxa laguugu sheegayaa wakhtiyada muhimka ah, taariikhda ciqaabtu dhammaaneyso, taas oo ugu dambeyn lagu sii deynaayo. Waxad heleysaa xitaa taarikh ah, wakhtiga laga yaabo inay jiri karto wax ku saabsan bixitaan iyo sii deyn tijaabo ah.

Haddii aadan ku raacsansaneyn xisaabta ciqaabta, waxad ku dacwoon kartaa kadib sharciyada caadiga ah; fiiri qeybta ku saabsan dacwadaha. Kuma raacsanid qaabka loo fasirtay xukunkan sow maaha, waxad markaa shardi ka dhigi kartaa, in xisaabta ciqaabta loo wareejiyo maxkamadda.

## 6. Wadajir

Gudaha xabsiga waxad sida caadiga ah la joogtaa maxaabiis kale wakhtiga shaqada iyo wakhtiga fasaxa. Badanaa xabsiyada waxad fursad u heleysaa inaad ku ahaato kali qolkaaga/fadhigaaga wakhtiga fasaxa iyo habeenkiiba. Xabsiyada qaar waxa xitaa suurtogal ah inaad wakhtiga ciqaabtaada lagugu hayo wadajir la´aan/la joogid la´aan maxaabiis kale, tusaale ahaan si looga hortago fakad ama rabshad.

Jeelalka degmooyinka iyo xabsiyada Kobenhagen wey xaddidan yihiin fursadaha wadajir/ wadajoogis.

Waxa ka jira sharciyo khaas ah oo wadajirka ah, haddii aad ka yar tahay 18 sano. Weydi shaqaalaha wixii dheeri ah.

**7. Caawimaad shakhsi, bulsho, iyo sharciba**

Inta lagu hayo, waxad khaasatan ka helikartaa caawimaad iyo talo bixin shaqaalaha qeybtaada. Waxaad xitaa la hadli kartaa shaqaalaha qeybta ama talobixiyayaalka xabsiga wixii ku saabsan dhibaatooyinkaaga shakhsiyadeed iyo bulsho adiga iyo qoyskaaga.

Marka aad timaado xabsiga ama jeelka, waxa lagaala talinayaa xuquuqahaaga, waajibaadyada iyo xaaladaha khaaska, ee ka jira halkaa xilliga aad ku jirto. Todoba maalmood gudahooda waa in adiga iyo hay´ada xabsiga aad si wada jir ah u soo saartaan jadwal iftiiminaya howlaha aad qabanaysid intii aad xabsiga ku jirto iyo kadib waqtiga ugu horeeya markii lagu sii daayo.

Haddii aad u baahan tahay kaalmo kale oo khaas ah, waxad la xiriiri kartaa baadariga xabsiga/jeelka, kalkaaliyeyaalka, dhakhtarka, dhakhtarka ilkaha, baraha, iyo hogaanka.
Ma qabtaa su´aal ku saabsan xukunkaaga ciqaabta, waxad markaa caawimaad ka raadin kartaa qareenkaaga. Su´aalaha kale ee sharciyeed mar marka qaar kaaga jawaabi kara talobixiyaha bulshadeed ama shaqaalaha sharciga ee xabsiga ama xafiiska degmada. Shaqaaluhu waxa ay kuu diri karaan xitaa qareen, ku siiya caawimaad-xuquuq oo dowli ah.

**8. Alaabada iyo lacagaha**

Waxa tusaale lagu siinayaa alaabo, go´yaalka sariiraha, shukumaan iyo dhar shaqo. Waxa mararka qaar aad la iman kartaa alaabadaada, tusaale: dhar iyo sawiro.

Sharciyada ku saabsan, alaabadaada aad la iman karto, wey ku kala duwan yihiin xabsiyada xiran, xabsiyada furan iyo jeelalka.

Weydi shaqaalaha, bal in lagugu wareejin karo waxyaabaha aad leedahay ee laguu soo diro iyo lacagaha ama inaad hesho ogolaansho in loo diro lacagtaada ama waxyaabaha aad leedahay xabsiga bannaankiisa. Sida caadiga ah lama ogola in lacag loo diro xabsiga xiran bannaankiisa, marka laga reebo lacag aad shaqeysatay.

Xabiga sida sharcigiisa guud ahaaneed mas´uul kama aha dhibaatadi soo gaarta, burbur, ama xatooyada alaabtaada.

**9. Raashin/cabitaan iwm.**

Sida uu yahay sharciga guud ahaaneed waxa lagu siinayaa lacagta raashinka, marka laguugu hayo xabsi, si aad adigu kaligaa u iibsan karto raashin. Xabsiga waxad ku helesaa raashin la sameeyey. Dhakhtarku waxa uu sababo caafimaad aawadeed qori karaa raashin khaas ah.
Haddii aad tahay khudrad ku nool ama sabab diintaad aawadeed aad u baahan tahay raashin khaas ah, xilliga raashinka la sameynayo waa la daboolayaa baahiyahaaga sida caadiga ah. Waxad weydiin kartaa shaqaalaha qeybta ama haddii uu jiro wadaad.

Waxad ka iibsan kartaa qaxwe, tubaako, iyo badeecadaha kale ee la is-ticmaalo gudaha xabsiga ama jeelka. Waxyaabaha la iibsan karo wey ku kala duwan yihiin xabsiyada.

**10. Sigaar**

Sigaarka waa ka mamnuuc gudaha dhammaan hay'adaha hoos yimaada adeega xabsiga iyo carbinta. Waxaa la ogol yahay dibada. Qabanqaabada sigaarka way ku kala duwan yihiin hay'adaha.

Tubaakada, sigaarka iyo waxyaabo kale oo sigaarka la xiriira waxa lagu hayn doona armaajo ka baxsan qolkaaga ama shaqaalaha ayaa hayn doona. Armaajadu waa in had iyo jeer ay qufulan tahay, haddii adigu aad gaar u leedahay - adiga baa haysan doona furaha.

Waxa dhici karta inaadan ku haysan doonin tubaako ama waxyaalaha sida sigaarka loo cabbo qorlkaaga. Hadii aad xadgudub ku samaysid mid ka mid ah xeerarka ayaa ku mutaysan doontaa ciqaab edbin ah.

Haddii aad rabto in aad joojiso sigaarka, weydii shaqaalaha in aad ku biiri kartid barnaamijka joojinta sigaarka.

## 11. Shaqo iyo waxbarasho

Haddii lagu dhigo xabsi, waxad u leedahay xaq iyo waajib in lagugu howlgeliyo shaqo, waxbarasho ama waxyaabo kale, oo ay ku jirto daweyn. Waa lagu siinayaa lacagta shaqo ee howlgelinta. Haddii dhakhtarku fasax xanuun ku geliyo adiga, waxad heleysaa lacagta jirada/xanuunka.

15% mushaharkaaga markaad shaqaynayso ama aad xanuusan tahay waxa loo dhigi doonaa in lagu isticmaalo daboolista kharashka la xiriira bixidda ama sii daynta.

Xeerar gaar ah ayaa khusayn doona kuwa ay tahay in la masaafuriyo – waydii shaqaalaha.

Haddii lagu dhigo jeel, waxad xaq u leedahay shaqo, laakin waajib kuguma aha.

Deeqda kusaabsan shaqo iyo waxbarasho waa ku kala duwan yihiin xabsiyadu, waana mid xaddidan gudaha jeelka. Gudaha xabsiga waxad sida caadiga ka shaqeyn kartaa shaqo wax- soosaar oo meel wax lagu sameeyo oo dhul – iyo howd/geedo loo isticmaalo, nadaafad, dhowridda dhismooyinka ama dhowridda jardiino iyo wax sida mashiin iwm. Jeelalka inta badan shaqadu waa shaqo wax-soosaar oo fudud iyo dhowrid dhismooyin.

Waxbarashadu waxa ay ka dhacdaa iskuulada xabsiga, marka la eego aqoonkorodhsiyada ama kijooyinka, ama waxa qabanaya macallimiin jeelka la xiriirsan waxana ay sida caadiga ka kooban tahay waxbarashada caaadiga ee dadka waaweyn ama waxbarasho khaas ah.
Waxaa si aad ah inti suurtogal ah la tixgelinayaa dalabkaaga iyo kartidaada. Weydi tusaale ahaan shaqaalaha wixi ku saabsan fursadaha.

Waxad xaalado khaas ah heli kartaa in laguu ogolaado inaad ka shaqeyso ama wax ka barato xabsiga dibaddiisa (” xoriyad socod”) ama aad wadato shaqadaada adiggoo ka imaanaya xabsiga. Haddii aad leedahay dakhli shaqada kaa soo gala, tusaale: xorriyad socod-ka shaqo tagidda, waa inaad caadi ahaan iska bixisaa daganaanshada xabsiga. Waxad ka ogaad kartaa in badan shaqaalaha.

## 12. Daaweyn

Haddii aad leedahay baahi khaas oo daweyn, waxad dhacdooyinka qaar heleysaa fursad in laguugu hayo meel ka baxsan maamulkaa xabsiyada iyo maxaabiista. Haddii aan la sameyn karin, maamulka xabsiyada iyo maxaabiistu waxa uu leeyahay deeq-daweyn fara badan oo kala duwan, kuwaas oo aad u isticmaali karto, tusaale haddii aad leedahay dhibaato khalad u isticmaalid aakolo- ama mukhaadaraad/maandooriye ama laguugu xukumay rabshad amaba dambiga galmo. Maamulka xabsiyada iyo maxaabiista waxa uu leeyahay buug yar oo ku saabsan fursadaha daweyn iwm. Weydi shaqaalaha wixi ku saabsan arrinkaa.

## 13. Waqtiga fasaxa

Waxad sida caadiga ah xaq u leedahay ugu yaraan hal saac oo hawo xor ah maalin walba (” socod”).

Da’ yarta ka yar 18 jir waxay xaq u leeyihiin laba saacadood oo jimicsi ah maalintii, oo ay waajib tahay in mid ahaan ugu yaraan dibadda tahay.

Waxad fursad u heysataa inaad dhegeysato raadiyo, fiirsato taleefishin- iyo inaad akhrisato jaraa´ ido, joornaalo iyo buugaag. Weydi shaqaalaha wixi ku saabsan fursadaha inaad kireysato raadiyo iyo taleefishin iyo inaad amaahsato ama iibsato joornaalo, jaraa ´ido iwm. Deeqaha wakhtiga fasaxa aad bey ugu kala duwan yihiin xabsiyada furan iyo jeelalka aadka u xaddidan. Xabsiyada waxa lagu deeqaa isboorti, tababar jireed, howlo hobi kala duwan iwm. Weydi shaqaalaha wixi ku saabsan arrimahaa.

**14. Diin**

Xabsiyda iyo jeelalka qaarkood waa lagu cibaadeystaa. Waxad xaq u leedahay inaad la hadasho baadari/wadaad ama wax la mid ah oo bushada diintaada ah. Baadariyada xabsiga, ee ka socda kiniisadda waxa dheeraad ku ah, iney jiraan xabsiyada qaarkood xiriir la leeyihiin dad ka socda diimaha kale, tusaale ahaan imaamyo iyo dad ka socda diinta katooliga.
Baadariyada xabsiga ama shaqaalaha waxa dheeraaad ah oo ay kuu sameyn karaan in ay la xiriiraan baadari bannaanka ka imaanaya ama wadaad la mid ah oo ka socda diintaada.
Haddii diintaada kaa mamnuuceyso inaad shaqeyso maalmaha qaarkood, waa in taas laguu tixraaca.

**15. Jirro ama Xanuun**

Waxa jira dhakhtar xabsigu/jeelku leeyahay.
Marka lagu dhigo xabsiga waxa laguugu deeqaa wadahadal aad la yeelaneyso dhakhtar ama kalkaaliso/kalkaaliye. Haddii intaa kadib ay kula tahay, inaad u baahan tahay dhakhtar, waa inaad u sheegtaa shaqaalaha, oo u sii gudbinaya dhakhtarka/kalkaalisada ama kalkaaliyaha.

Dhakhtarka ayaa qiimeynaya, in lagu daweynayo iyo in kale, iyo bal in daweynta lagugu siin doona gudaha mid ka mid ka mid ah jeelalka maamulka xabsiyada iyo maxaabiista ama cusbitaal caadi ah.

**16. Daweynta ilkaha**

Xaq baad u leedahay hababka qaar in ilkaha laguugu daweeyo. Waxa dhacda mararka qaar in ay tahay inaad iska bixiso adigu kharashka. Weydi shaqaalaha wixi ku saabsan arrinkaa.

**17. Booqasho**

Xaq baad u leedahay in lagu soo booqdo ugu yaraan hal saac, iyo hadba inti suurto gal ah laba saacadood todobaadkiiba. Xabsiyada waxa suurtogal ah badanaa fursad in badan iyo booqasho wakhti dheer. Soo booqdayaalka waa in sida caadiga ah horey loo soo ogolaadaa.

Shaqaaluhu lama joogaan sida caadiga ah soo booqdayaalka. Xaq baad u leedahay inaan laguugu waardiyeyn oo aan dusha lagaa eegin xilliga uu ku soo booqanayo qareenka kaa difaacaya kiiska ciqaabta, ee sababta u noqday in lagu dhigo xabsiga, ama kiiska ciqaabta kuugu soo socota adiga. Sidaas oo kale ayey la mid yihiin qareenada kale, ee loo magacaabay inay wax difaacaan.

Haddii aadan laheyn qoys ama saaxiibo, ku soo booqan kara, waxad weydiisan kartaa shaqaalaha bal iney jirto fursadda ah inaad hesho saaxib booqasho.

Waxad sida caadiga ah aad heli kartaa iney ku soo boodaan jaraa´idada, laakin waa in maamulka xabsiyada iyo maxaabiistu ogolaadaa arrintaa, maadaama xannibaadaha qaar ay khusayn karaan waxa laguu oggol yahay inaad u sheegto warbaahinta.

## 18. Taleefon

Xabsiyada furan waxa jira taleefanada shilimaadka lagu shubo- ama kuwa kaarka. Xabsiyada xiran iyo jeelalka kaliya waxad taleefon diri kartaa, haddii aad hesho ogolaansho khaas ah.
Waa inaad sida caadiga ah adigu iska bixisaa kharashka taleefonka aad ku hadleysid. Shaqaaluhu waa kuu dirayaan taleefanka sida caadiga ahna hadalkaaga wey maqlaan. Meelaha ugu badan ee xabsiyada xiran iyo xabsiyada Kobenhagen waxa jira hab khaas ah oo ku saabsan taleefonada kaarka. Shaqaalaa ayaa wax kaaga sheegi kara.

Waxa waajib ah inaad guud ahaan bixiso kharashka wicitaanka.

Waa mamnuuc in taleefon moobiil ah lagu heysto xabsiga gudihiisa. Xabsiyada xiran iyo jeelalka waa arrin ciqaab keenta in lagu heysto taleefon moobil gudaha. Sidaas si la mid ah ciqaab bey keentaa, haddii saaxibadaa ama qoyska ay heystaa taleefon moobil, marka ay kugu soo booqanayaan xabsi xiran ama jeel.

## 19. Waraaqo

Waraaqahaaga lama akhrinayao, marka laga reebo in lagu qiimeeyo inay muhim tahay in la akhriyo iyadoo loo fiirinayo arrimo la xiriira nidaamka-ama amniga, si looga hortago duufsiga ama faldambiyeedka, ama loogu dhaqmo xeerka khuseeya xukunada xabsi daayinka ama kahortagga,amaba si loo ilaaliyo difaaco dhibanaha aad xadgudubtay Sababtaas oo kalena waraaq waa loo heysan karaa.

Waraaqaha kugu socda sida caadiga ah waa la furaa, bakhshadda waxyaabaha ku jirana waa la kontoroolaa, adigoo arkaya.
Waraaqaha aad ka dirto xabsiyada ama jeelalaka waa la kontoroolaa badanaa ka hor inta aan la dirin. Xabsiyada furan lama kontoroolo waraaqaha si caadiga ah ka hor inta aan la dirin.

Shaqaaluhu waa inaaney furin waraaqaha ka yimaada iyo kuwa kuwa ku soca maamuladan: Wasiirka caddaaladda, agaasinka maamulka xabsiyada iyo maxaabiista, maxkamadda, Maxkammadda xuquuqda dacwo ee khaaska, guddiga kharashka howsha, maamulka dacwooyinka, booliska, maamulka baarlamaanka ee ilaalinta nidaamka, xubnaha baarlamaanka, maamulada kale ee dowliga ah, Maxkamadda xuquuqda dadka ee Yurub, Guddiga Jirdilada ee Yurub, Guddiga xuquuqda dadka ee Qaramada Midoobey, Guddiga Jirdilada ee Qaramada Midoobey, qareenka ku difaacaya ama ka shaqeynaya kiiskaaga maxkamadda, oo ay hoos timaado sii deyn tijaabo ah inta kiiska laga shaqeynayo. Waxaa iyaga la mid ah qareenada loo aqoonsado in ay wax difaacaan.

Taa liddigeeda ama bedelkeeda waa la iftiimin karaa oo nal lagu shidi karaa waraaqahan si looga hortago in wax lagu soo qariyo.

Haddii ay kugu adag tahay inaad wax akhrido ama qorto, waxa haboon inaan u sheegto shaqaalaha, kuwaas oo kugu caawinaya adiga tusaale ahaan duubid cajallad hadal ama kuu kordhinaya taleefon ku hadlidda.

## 20. Bostada dijitalka ah – waraaqaha/mail ka masuuliyiinta dawladda

Maxaabiista badankoodu ma laha fursad ay ku galaan shabakadda internetka oo sidaas daraaddeed ma eegi karaan Boostada dijitaalka ah / email. Haddii aanad haysan internet waa lagaa joojin karaa Boostada dijitalka / email-ka, waxaanad cinwaankaaga diiwaangashan (haddii aanad bixin cinwaan kale) ku heli doontaa waraaqaha boostada caadiga ah oo kaaga yimaada hay´adaha iyo xafiisyada dawlada. Waxa kale oo aad dooran kartaa in qof qaraabadaada ka mid ah qoraalada ooga wakiilatid, si uu isagu / iyadu Boostada dijitaalka kaaga wargeliyo. Weydii shaqaalaha wixii macluumaad dheeraad ah.

## 21. NemID

NemID waxaa samayn kara ama hayn kara shaqaalaha adeega hay´adaha xabsiga iyo carbinta maxaabiista lagu hayo xabsiyada maxaliga ah, xabsiyada ama guryaha la seexdo. Maxaabiista way isticmaali karaan NemID haddii loo ogol yahay inay galaan shabakadda internetka ee xabsiga ama guriga ay degen yihiin.

Waxaa kale oo ay isticmaali karaan NemID marka fasax galaan ama ka dib marka la sii daayo.

**22. Doorasho iwm.**

Waxad xaq u leedahay inaad ku codeyso waraaq doorashada baarlamanka, doorashada degmada iwm. Sidoo kale xaq baad u leedahay inaad ka qeyb qaadato qaab kale oo sharci ah, howl siyaasadeed.

**23. Af-hayeen iwm.**

Maxaabiistu waxa ay xaq u leeyihiin inay saameyn ku yeeshaan xaaladda xabsiga. Taasi waxa ay ku dhici kartaa iyadoo loo maro af-hayeen ay doorteen maxaabiista.

**24. Bixitaan.**

Inta badan maxaabiista xabsiyada furan waxa ay helaan bixitaan caadi ah saddexdi maalin fasax weekendhi mar ("fasax"). Marka ugu horeysa ee aad fasax heli karto waa 30 maalmood markī aad joogtid xabsiga, mararka qaarkoodna waxey qaadataa wakhti aad u dheer.
Waxa jira xitaa fursad fasax xabsiga xiran, laakin looma gaaro fursaddaas si dhakhso ah sida xabsiga furan. Weydi shaqaalaha wixi ku saabsan arrintaa.

Haddii aad khalad u isticmaasho bixitaanka bannaanka, tusaale aad iska maqnaato, isku daydo inaad soo gelisid mukhaadaraad ama alkolo ama aad ku kacdo dambi cusub, waa lagaa qaadi karaa ogolaanshaha u bixitaanka dibedda. Ogolaanshaha xitaa waa lagaala noqon karaa, haddii aad tusaale khalad u isticmaasho, ku heysato ama ku iibiso mukhaadaraad gudaha xabsiga. Haddiise aad ku jirto xabsi furan waxad halis ugu jirtaa in laguu wareejiyo xabsi xiran.

Maxbuus ahaan waxad leedahay fursad in laguu sii daayo dibedda marka ay jirto ulajeedo khaas ah, tusaale: haddii shakhsiyaad, kuu dhow, xannuunsadaan ama dhintaan. Ogolaansha bixitaanku waxa uu u baahan yahay mar walba, in ay jirto ulajeedo keenta bixitaanka, taas oo la aqbalo, oo aan halis ku aheyn in khalad loo isticmaalo. Bixitaanka dibaddu mararka qaar waxa uu noqdaa mid uu qof kale kula socdo.

**25. Sii deynta tijaabada ah**

Maxaabiista waxay sida caadiga ah xaq u lahaan karaan in loo sii daayo tijaabo ahaan, marka ay u dhammaato saddex meelood laba meel ciqaabta. Sida caadiga ahna taasi waxa ay khuseysaa oo kaliya, haddii ciqaabtaadu aad gudatay ugu yaraan 2 bilood.

Xaaladaha qaarkood waxa laguu sii deyn karaa si tijaabo ah inta u dhexeysa kala bar wakhtiga iyo saddex meelood laba meel wakhtiga. Taasi waxa ay ku dhici kartaa tusaale ahaan, haddii xilliga lagugu hayo halkaa aad sameyso dadaal dheeraad ah si aad uga hortagto inaan ku dhacdo dambi cusub, tusaale inaad ka qeybqaadato iska daweynta mukhaadaraadka- ama aalkolada oo si khaldan loo isticaalo. Weydi shaqaalaha wixi dheeraad ah.

Kuwa ku xukuman xabsi daa´imka waa lagu sii deyn karaa si tijaabo ah, markii ay ugu yaraan 12 sano oo ciqaabta ah ay u dhammaato.

Waa xabsiga ama wasaaradda caddaalada (Agaasinka maamulka xabsiyada iyo maxaabiista), kuwa go´aanka ka gaaraya, bal in si tijaabo ah laguu sii daayo. Haddii lagu qiimeey, in aan lagu sii deyn talin tijaabo ah, maxaayeelay ay jirto halis ah, inaad ku dhaceyso dambi cusub, waa la diidi karaa sii deynta tijaabada ah.

Sii deynta tijaabada ah waxa la isla dhigaa wakhti tijaabo ah. Haddii aad ku dhacdo dambi cusub wakhtiga aad ku jirto sii deynta tijaabada, waxa ciqaabti kuu hartay laguugu darayaa ciqaabta cusub.

Dhacdooyinka qaar waxa lagugu sii deyn karaa tijaabo xaalad ay indhaha kugu haynayaan maamulka xabsiyada iyo maxaabiista. Intaas kadib waxa ay ahaan kartaa xaalad khaas ah oo ku saabsan tusaale ka daaweyn aalkolo (ka daaweyn aalkoliistenimo).
Haddii aad ku xadgudubto xaaladda, waxa ay maamulka xabsiyada iyo maxaabiistu go´aamin karaan, inaad ku laabato xabsiga (mar kale xirid).

### 26. Ogeysiinta dhibanayaasha

Haddii lagugu xukumay dembi xadgudub ah – sida weerar, gaboodfal nafsiyeed, dabagur, hanjabaad ama kufsi - oo xabsiga lagugu haayay ilaa uu xukunkaaga dhaco, dhibanaha aad dembiga ka gashay waxuu codsan karaa in la ogeysiiyo in xaaladahan soo socda:

- Marka ugu horaysa oo laguu fasaxi doono inaad keliga dibada u baxaysid
- Haddii fulinta xukunkaaga si ku meel gaar ah loo joojiyo ka hor fasaxa laguu ogol yahay inaad kaliga dibada aadid
- Haddii aad joogtid meel ka baxsan xabsiga oo ay surrtogal tahay inaad qaadatid fasax aan weydiin u baahnayn ka hor inta aan la gaarin fasaxa ugu horeeya ee weydiinta aan u baahnayn
- Marka lagu sii daayo
- Haddaad maqan tahay

Dhibanaha ayaa sidoo kale codsan kartaa in la ogeysiiyo xaaladahan soo socda:
- Haddii aad ka dhex muuqan doonto barnaamijka raadiyaha ama TV-ga ee laga baahiyo Denmark ama meel caan ah
- Haddii lagaa waraysanaayo wargays danish ah

Booliska ayaa go'aan ka gaaraya in dhibbanaha loo wargalin doono.
Dhibbanaha wuxuu codsan karaa in laga wargeliyo waxii ku saabsan fasaxaaga aad dibada u baxaysid iyo xaaladaha la xiriira sii dayntaada, haddii aad dembiga aad gashay ka dib ma 1 July 2011. Haddii aad ka muuqanaysid saxaafada xeerarka ogeysiinta dhibanaha waa sharci wax ku ool ah, door ma ciyaarayso waqtigii aad dembiga gashay.

### 27. Qaanuunada, amarada iyo mamnuuca

Waxad xaq u leedahay inaad aragto, waxa ku qoran qawaaniinta maamulka xabsiyada iyo maxaabiista iyo shuruucda xabsiyada ee Yurub, oo ay la jirto waxyaabaha xabsigan ama jeelkan sharciyo isaga u khaaska ah.

Aalkolada iyo mukhaadaraadku waa mamnuuc. Waxa iyadana la mid ah daawada, uusan qorin dhakhtar.

Waxa ay keentaa ciqaab in laga baxsado xabsiga/jeelka.

Intaa kadib waa inaad u hogaansanaataa sharciyada jira iyo talooyinka shaqaalaha.

### 28. Ciqaabta dishibiliinka/aadaabta iwm.

Hadii aad ku xadgudubto sharciyda, waxa laguugu xukumi karaa ciqaab dishibiliin oo ah qaab digniin, ganaax, bixista oo laguu diido, booqashada oo lagaa xayiro, qorista waraaqda ama isticmaalka taleefanka oo la xayiro, ama in kalidaa qol lagugu xiro. Waxad leedahay xuquuq kala duwan oo la xiriira dacwadaha dishibiliinka, oo shaqaalaha kugu wargelin doono, oo ay ku jirto xaqa inaad hadashid oo aad ka hadashid kiiskaaga, ka hor inta aan go´aan lagaa gaarin iyo inaad hesho sababta go´aanka. Waxa mararka qaar lagaala noqon karaa xuquuqda inaad xiriir la samayso maxaabiista kale. Fiiri sidoo kale **Cabashooyinka**.

**29. Baaritaan**

Marka lagu soo dhigo xabsiga/jeelka, waa lagu baarayaa (fatashayaa). Taas macnaheedu waxa uu yahay, in shaqaaluhu ay baarayaan, bal inaad soo qaadatay alaab, aysan ahayn inaad ku heysato gudaha xabsiga/jeelka. Haddii ay shardi noqoto, waa inaad iska bixisaa dhammaan dharka – xitaa haddii ay arrintani liddi ku tahay diintaada. Baaritaanka noocan ah waxa sameynaya shaqaale leh jinsiga aad leedadahy, yacin ragga waxa baaraya rag, dumarka waxa baaraya dumar.

Waa lagu baari karaa xitaa inta aad degen tahay xabsiga, tusaale kahor iyo kadib booqashada. Amnigaaga aawadiis qolka aad degen tahay xitaa waa la baaraa. Fiiri sidoo kale **Cabashooyinka**.

Waxa xitaa lagugu amri karaa inaad kaadi iska qaado si loo baaro, bal inaad qaadatay maandooriye mukhaadaraad.

**30. Isticmaalka awood iwm.**

Dhacdooyinka qaar shaqaaluhu waxa ay xaq u leeyihiin inay isticmaalaan awood iyo aalado hubaal. Shaqaaluhu waxa ay tusaale isticmaali karaan qabashooyin kala duwan ama katiinadda gacmaha lagu xiro ee booliisku isticmaalo oo kale. Fiiri sidoo kale **Cabashooyinka**. Nooc kasta oo isticmaal awoodeed ah waxa uu u baahan yahay kontorool aad loo hubiyey, shuruudo aad mucayan u ahna la fuliyey. Isticmaalk awooddu waa inuu ahaadaa mid aad looga taxaddaray hadba inti suurtogal ah waana inuu ahaadaa lagama maarmaan si loo gaaro ulajeedada. Fiiri dacwadda hoosteeda.

**31. Magdhaw xorriyad ka qaadidda dambi laawe**

Waxad xaq u leedahay magdhaw, haddii adigoon dambi laheyn lagu dhigay xabsi wakhti dheer, lagu keenay adigoon dambi laheyn qolka wareysiga, qolka ciqaabta ama qol ku xabbisid amaba adigoon dambi laheyn laguu diiday dad la joogid iyo wadajirka. Haddii laguu geystay xorriyad ka qaadid adiga oo aan dambi laheyn, waxad xaaladaha qaar, marka shuruudo khaas ah ay jiraan, aad heli kartaa magdhaw.

**32. Magdhaw ku saabsan shilalka**

Waxaad xaq u leedahay magdhaw haddii aad ku dhaawacanto xukunkaaga jeelka. Waxaad dalban kartaa magdhow la xiriira shilalka ka dhaca, goobta shaqada iyo sidoo kale shilal dhaca inta lagu jiro xilliga firaaqada aad tahay. Sidoo kale waxaad heli kartaa magdhow tusaale ahaan hadii ay muraayadaha indhaha kaaga jabaan shil awgiisa.

**33. Maareynta Kiiska**

Caadi ahaan waxaad xaq u leedahay in aad ka hadashid kiiskaaga inta aan la gabogabayn ka hor. Sida caadiga ah diidmooyinka iyo go'aamada lagugu soo rogaayo oo dhan waa in wax la taaban karo oo sabab leh yihiin. Waxaad xaq u leedahay in aad hesho go'aan qoraal ah. Sida ay xeerarka sheegayaan, waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqulada dokumentiyada kiiskaaga iyo in aad ka hadashid inta aan go'aan laga soo saarin.

Sharciyada qaaska ah waxaa loogu talo galay tusaale ahaan xaaladaha ku saabsan doorashada hay'adda fulinta, marka laga reebo ururka iyo kala wareegida u dhexeeysa hay'adaha xabsiga deenishka iyo adeegga carbinta. xaaladaha noocaas ah xaq uma lihid inaad hesho dukumiinti, oo sidaas daraaddeed waxaad kaloo xaq u lahayn in laguu sababaha go'aanka, iyo waxyaalo kale.

**34. Dacwooyin**

*Cabashooyinka ku saabsan go'aanada ay gaaraan adeegga deenishka ee xabsiga iyo carbinta*
Sida caadiga ah sharci ahaan kama dacwoon kartid go´aamada ay gaaraan adeegga denishka waaxda xabsiyada iyo carbinta. Laakiin, waxaa suurtagal ah inaad ka cabato go'aamada la xiriira:

- Meelaynta iyo u gudbinta
- diidmada ku meelaynta dhallinyarada dambiga gashay sida u qabo qodobka 78 ee Fulinta Sharciga Xukunka iyo ka laabashada oggolaanshaha
- xisaabinta Xukunka
- Baaritaanka shakhsi ee maxbuuska
- Qolka dishibiliinka,  qolkawareysiga iyo ka joojinta bixista
- Meelaynta qolka difaaca, isticmaalka jeebbo iyo tallaabooyin kale oo loogu talo galay ka hortag
- Isticmaalka xoog
- Isu geeynta maxaabiista
- Kala bedelashada waraaqaha
- Booqashooyinka, oo ay ku jiraan diidmooyinka codsiyada in ilmahaaga kula joogo
- Xad u yeelida xaqa aad u leedahay inaad la xiriirto warbaahinta
- Fasaxa
- Ka tegida
- la wareegida
- Siidaynta shuruuda leh
- Dib u yeerida sii daynta shuruuda leh kadib
- Ka Noqoshada ogolaashaha isticmaalka aalad elektaroonik ah
- Magdhawga tallaabooyin aan la mutaysan oo lagugu rogay.

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo faahfaahsan oo ku saabsan fursadaha dacwooyinka aad ee falka xabsiga kaga dacwoon kartid, hadii ay noqoto falal ku saabsan arimaha xabsiga iyo arimaha shaqsiga. Shaqaaluhu waxay kaa caawin kartaa inaad hesho dokumentiyada saxda ah.

Haddii aad xaq u leedahay inaad ka cabato go'aanka, shaqaalaha baa warkaasi kuu sheegi doono. Hadii ay go'aamada yihiin kuwa qoraal ah, fursadaha dacwadaha waxaad ka arki kartaa go'aanka qoran.

Haddii aad rabto inaad u dacwooto Agaasinaka maamulka xabsiyada iyo maxaabiista, waa inaad sameysaa dacwada 2 bilood gudahood kadib marka go´aan gaarista laguugu wargeliyey.

*Cabashooyinka ku saabsan anshaxa shaqaalaha*
Waxaad u caban kartaa maamulka xabsiga haddii si qaldan laguula dhaqmay ama laguugu gaboodfalay. Adeegga Xabsiga iyo Tijaabada waxa ku waajib ah inay baaraan eedaymaha falka dambiilenimo.

*Go'aanka ay gaaraan waaxda xabsiyada iyo carbinta*
Marka agaasinku go´aan kagaaro dacwadaada, waxa aad leedahay fursad in kiisaska qaar la hor dhigo maxkamadda. Kuwaas waxa ay yihiin go´aanada ku saabsan

- Xisaabinta wakhtiga ciqaabta,
- Go´aanda qaar ku saabsan waraaqaha lagaa heysto,
- Go´aanka ku saabsan ciqaabta aadaab ee qaab qol ku xiridd in kabadan7 maalmood,
- Go´aanda qaarkood ee ku saabsan ka qaaditaan alaabo ama lacag,
- Go´aanada qaarkood ee ku saabsan in lacagaha magdhawga laga jaro mushaharkaaga shaqada
- Diidmada siideynta tijaabo kadib xirnaanta saddex meelood meel ciqaabti mucayanka aheyd ama 14 sano oo xukunka wakhtiga nolosha oo dhan,
- Go´aanada qaar ku saabsan dib u xiridda
- Go´aanda qaar oo ku saabsan diidmada magdhaw xarig dambi la´aan ah xilli ciqaab adag.

Marka go´aan laga gaaro kiis go´an, waxa lagaala talinayaa bal, inaad ku xiri karto shardi ah in go´aanka la keeno maxkamadda. Ma dalbaneysaa in go´aanka la keeno maxkamadda, waa inaad taa weydiisataa,4 todobaad gudahood kadib marka go´aanka lagugu wargeliyey adiga.

*Nidaam ilaaliyaha baarlamaanka*

Kiisaska kale waxa aad geyn kartaa go´aanka nidaam-ilaaliyaha baarlamanka. Nidaam ilaaliyaha baarlamanku asagu ma bedeli karo go´aanka, laakin waxa uu weydiisan karaa agaasinka maamulka xabsiyada iyo maxaabiista inuu bal mar kale eego kiiska. Dalabyada nidaam ilaaliyaha sida jirta waa la raacaa.

*Talo bixin habka aad u dacwoon karto*

Ka dacwoodka xaaladaha  xabsiga dhexe ama xabsiyada yar yar ee aad ka dacwoonayso  shaqaalaha xabsiga.
Waxaa lagugu baraaru jinayaa in aad fursad u leedahay in aad  ka dacwooto xaalada xabsiga dhexe ama xabsiga yar iyo in sidaas oo kale hadii laguu geeysto xadgudub iyo wixii la mida. dhinaca shaqaalaha oo aay kuu geeystaan shaqalaha xabsigu.Waxaa taa la mid ah hab dhaqanka shaqaalaha ama habka aay u dhaq mayaan,hadii aad la kulantay sida aay shaqaaluhu u dhaqmayaan iyo sida aay kuula had layaan in aay tahay mid xad gudub quursi iyo wax la mid ah .
Waxaad dacwadaada u gu gudbin kartaa shaqaalaha bashqad ama wargad xiran  adigoo ka codsanaaya ,in loo gudbiyo maamulka  goobta ama agaasimka xafiiska  nawaaxiga,ama Madaxa ugu sareeya.markaas kadib waxaa war qadaada furaya qofka aad ku hagaajisay,ee aad u dirtay,Waxa aad ogaataa, in arinka baaritaan lagu samaayn doono ,taas oo keenaysa in la waraaysto dhinacyada aay khusaayso ama dadka dacwadani khusaayso.

**35. Sharciga warbixinta shakhsi/sharciga daatada qofka**

Marka lagu soo dhigo xabsiyada maamulka xabsiyada iyo maxaabiista,waxaa la soo ururinayaa oo laga shaqeynayaa warbixinada shakhsiyadeed ee kugu saabsan adiga iyadoo la kaashanayo ku shaqeynta daatada elektaroonikada(kumbiyuutarada).

Sida uu dhigayo sharciga warbixinta qofka waxa aad fursad u leedahay in laguu sameeyo isticmaalka xuquuqahan soo socda:

- Xaqa baad u leedahay in lagugu wargeliyo wixi ku saabsan soo ururinta warbixinada loo isticmaalayo ku shaqynta-edb.
- Xaqa baad u leedahay inaad weydiisato nuqulka qoraalka warbixinada, laga shaqeynayo.
- Xaqa baad u leedahay inaad saxdo, tirtirto ama horjoogsato warbixinada, aan saxda aheyn, oo wax khaldaya ama qaab u muuqda in loogu isticmaalay edb-ga si liddi ku ah sharciga.

**36. Wargelin u khaaska ah ajaanibta** *Sharciyada*

Sharciyada ugu muhimsan ee xabsi ku heynta waxa la helaa iyagoo ku qoran afka ingiriiska. Waxa aadna ka amaahsan kartaa shaqaalaha.

*Dhibaatooyinka luqadda.*

Caadi ahaan waxad kula hadli kartaa shaqaalaha af-ingiriis, mararka qaarkoodna luuqado kale sidoo kale. Kuma hadashid sow maaha luqadahan, ama qof shaqaalaha ka mid ah amaba qof maxaabiista ka mid ah ayaa laga yaabaa inuu kugu caawin karo inuu kuu turjumo.
Shaqaaluhu wey kuugu yeeri karaan turjubaan ka yimaada dibedda, haddii ay muhim tahay iyo suurto gal.

*Af-hayeen*

Xabsiyada qaarkood waxa jira af-hayeen khaas u ah maxaabiista ajaanibta.

*Safaaradda iwm.*

Waxa aad fursad u leedahay inaad la xiirto safaaradda dalkaaga ama qunsulka.

Weydii  shaqaalaha wixi ku saabsan arrinkaa.

*Doorasho iwm.*

Waxa aad mararka qaar xaq u leedahay inaad codeyso doorashada degmooyinka iwm. Shaqaalaha weydi wixi ku saabsan arrinkaa.

*U gudbin dal kale si aad halkaa ugu dhamaysatid ciqaabtaada*

Waxa aad u leedahay mararka qaar fursad, in ciqaabtaada lagugu hayo oo aad ku qaadato dalkaaga ama dalka aad ku nooshahay.
Fursadaha u gudbinta wadan kale waxay ku xiran tahay xaalado kala duwan, sida dalka i lagugu wareejinaayo iyo waqtiga ka haray ciqaabta xabsigaaga. Dembiilayaasha waxaa caadi ahaan loo wareejiyaa dalka ay muwaadinka ka yihiin. Xaaladaha qaarkood, waxaa laguu soo celin karaa rabitaankaaga. Sarkaalada xabsiga weydii wixii war dheeraad ah.

*Joogitaanka wadan kale adiga shuruud lagugu sii daayay*

Mararka qaarkood dembiilayaasha lagu sii-daaayo shuruud waxaa laga yaabaa in wadan kale loo gudbiyo (sida caadiga ah dalalka ay muwaadiniinta ka yihiin). Xaaladdan oo kale, mas'uuliyada fulinta shuruudaha siidaynta waxaa leh wadanka dembiilaha loo gudbinaayo. Doorashada u sii gudbinta wadan kale waxay ku xiran tahay wadanka laguu wareejinaayo, waxyaabo kale, on dalka siiyey. Weydii shaqaalaha wixii macluumaad dheeraad ah.

*Dal ka saarid*

Haddii maxkammaddu goysay, in lagaa saaro dalka marka lagu sii deynayo, waxa sida caadiga ah lagugu heynayaa xilliga ciqaabtaada xabsi xiran.

Haddii lagaa saarayo dalka, waxa aad fursad u leedahay in si tijaabo ah laguu sii daayo ka hor wakhtiga caadiga ah. Waa lagu sii deyn karaa, marka lagu hayo kala bar wakhtiga ciqaabtaada, haddii ka mamnuucidda dal soo geliddu ay tahay mid joogto ah, ama marka 7/12 oo ciqaabtaa ah lagu hayo, haddii ka mamnuucidda dal soo gelitaanku uu yahay mid wakhti xaddidan.
Inkastoo aadan dalbaneyn sii deyn tijaabo ah, tusaale maxaayeelay waxa aad isku dayeysaa in xukunka dal ka saaridda la bedelo, waxa markaa lagu sii deynayaa kadib laba meelood saddex meel oo xilliga ciqaabta ah. Booliska ayaa go´aaminaya, sida dalka lagaaga saarayo, iyo kuna dadaalaya in dal ka saariddu dhacdo xilliga sii deynta. Weydi shaqaalaha wixi ku saabsan arrinkaa ama qareenka ku difaacaya, haddii shaki uu kaaga jiro waxyaabaha ku saabsan dal ka saaridda.

**37. Waxyaabaha u khaaska ah ehelada**

Ma dooneysaa inaad soo booqato maxbuus, waa inaad caadi ahaa xabsiga ka soo qaadataa ogolaansho booqasho. Xabsiga ayaa kaala talinaya waxyaabah ku saabsan shuruucda, ka jira booqashada, oo ay hoos timmaaddo dalbashada wakhti booqasho, nooca alaabta horey loo soo qaadan karo booqashada, iyo xaaladaha ku saabsan, inaad ogolaato alaabta aad soo qaadatay iyo dharkaaga in la baaro.

Waxa jira shuruuc ku saabsan, ilaa heerka maxaabiistu ay ku heysan karaan alaabadooda iyo lacagtooda xabsiga gudihiisa.

Waraaqaha, aad u direyso qof maxbuus ah, sida caadiga ah ma akhriyaan shaqaaluhu, laakin waxa sida caadiga ah fura waraaqda shaqaalaha xabsiga oo fiirinaya si ay u horjoogsadaan in wax la soo dhex geliyo. Waraaq, aad u dirto qof maxbuus ah, waa la akhrin karaa xaaladaha qaarkood. Sidaas si la mid ah waraaq waa la heysan karaa inta aaney gaarin qofki aad u dirtay. Sida caadiga ah waa in waraaqda dib loo celiyaa, mar walbana waa in 4 tododaab kadib lagu wargeliyaa qofka soo diray waraaqda wixi ku saabsan heysashada waraaqda.

Wixi ku saabsan fursadda maxbuuska ee dibed u bixid iyo taleefon dirid, ka fiiri dusha sare.

Xabsiyada xiran iyo jeelalka waa arrin ciqaab keenta, haddii aad wadato moobil taleefon, marka aad booqasho ku imaaneyso.

**38. Waajibnimada dhowridda xogta.**
Dhammaan shaqaalaha xabsiyda, jeelalka iyo maamulka xabsiyada iyo maxaabiista xilliga ay xorta yihiin waxa ay leeyihiin waajibnimada dhowridda xogta.

Warbixinada ku saabsan maxaabiista looma gudbin karo ehelada ama dad kale oo aan shaqo ku laheyn. Maxaabiista oo kaliya, ayaa u sheegi kara tusaale elehada wixi ku saabsan xaaladahooda shakhsiyadeed, marka laga reebo in maxbuusku siiyo shaqaalaha ogolaansho arrinkaa ku saabsan.

**39. Talobixinta taleefon**
Haddii aad qabto su´aal, waxa aad la hadli kartaa talo bixiyaha maamulka maxaabiista iyo xabsiyada oo aad ka helysaa warbixinno ku saabsan sharciyada iyo xuquuqaha adigoo u maraya talobixin taleefon oo qarsoodi ah ee maamulka maxaabiista iyo xabsiyada oo telfoonkoodu yahay: 70 26 04 06.

- Maalmaha shaqada: 9:00-14:00
- Fiidka Isniinta ilaa Khamiista: 19:00-21:00
- Axadaha: 12:00-16:00

Khadku lama heli karo Sabtiyada.

Direktoratet for Kriminalforsorgen
Strandgade 100
DK 1401 Copenhagen K

Phone 72 55 55 55

www.kriminalforsorgen.dk
dfk@kriminalforsorgen.dk